




# Dadaalkii Midha Dhalay Ee Xaliimo

Leveled



Af Somali



Buuggan akhriska dheeriga waxaa maalgalisay hay'ada USAID. Waxaana si wada jir ah isaga kaashaday daabcayna hay'ada Save the Children, wasaarada waxbarashada heer federal iyo xafiiska waxbarashada DDSI.

2009 T.I.



The CC By license lets others distribute, adjust, and build upon this work, for free or commercially, as long as credit is given to the original creation. However, any changes from the original must be indicated.

For more info please refer: <https://creativecommons.org/licenses/>



# Dadaalkii Midha Dhalay Ee Xaliimo

Fasalka 3

Toddobaadka 12



## Baraha qaaliga ahow

Waxaa buugan luugu talagalay in uu kobciyo awooda akhriska ee radayda fasalka 3<sup>aad</sup>.

Waxaaana lagu saleeyay manhajka cusub ee af-soomaaliga. Doorarka baruhu aad ayuu mihiim ugu yahay in ardaydu ka faa'iidaystaan buugan.

Sababtoo ah waxaa laga raba baraha in uu ku booriyo ama ku dhiirgaliyo carruurta in ay akhristaan buugtan. Hadaba baruhu waa in uu raaca talaabooyinkan soosocda, marka ay tahay ardaydu in ay ku akhristaan fasalka gudihiisa.

1. Ka hor intayna ardaydu akhrinta sheekada bilaabin, waa in uu baruhu weydiiyaa su'aalaha ka horeeya sheekada.
2. Waa in uu baruhu ardayda siiyaa waqti fiican ooy ku akhrin karaan sheekada.
3. Baruhu waa in uu usheegu ardayda in ay ku celceliyaan akhriska sheekada.
4. Ardaydu markay dhammeeyaan akhiska sheekada, baruhu waa in uu waydiiyaa su'aalaha ku qoran dhammaadka sheekada.

### Laylis

Su'aalaha akhriska ka hor

1. Sheeg wax tarka taraafiiga



Baribaa waxaa jiray gabadh la odhan jiray xaliimo. Xaliimo waxay la noolayd qoyskeeda oo ka koobnaa shan caruura ah iyo hooyadood. Caruurta waxay ahaayeen laba wiil iyo saddex gabdhood. Xaliima iyada ayaa ugu waynayd caruurta waxayna dhamaysay dugsiga sare. Xaliimo waxay caawisaa hooyadeed iyo caruurtooda. Had iyo jeerna way garab taagan tahay.

Xaliimo aabaheed waxa uu ku geeriyooday shil gaadhi isaga dhex socda magaalada dhexdeeda Ayaa waxaa ku dhuftay ama jiidhay gaadhi si aad ah u xawaaraynayay. Shilkaas ku dhacay aabahood ayaa aad u murugo galiyay qoyska gaar ahaan xaliimo.

Waxay xaliimo geeridii aabaheed kadib bilawday inay bulshada ka wacyi galiso shilalka gaadiidka.

Kuwaas oo ah kuwo aad ugu sii badanaya wadanka, saamayna dad aad u badan, hanti badana ay ku burburayso. Wixii intaas ka danbeeyay ayaay xaliimo waxa ay go'aansatay si ay wax uga qabato arintan shilalka gaadiidka,

Inay ku biirto ciidamada illaalada wadooyinka Halkaas oo ay rabto inay isbadal ka muujiso.

Waxay arinkan ay ku dhaqaaqayso kala tashatay hooyadeed. Hooyadeedna maadaama ay saygeedii ku wayday way soo dhawaysay wayna u ducaysay gabadheeda. Xaliimo ayaa waxay aaday xarunta taraafikada ee booliska halkaas oo ay iska diiwaan galisay. Waxaana loo diray tababar ay ku soo baranayso shuruucda iyo illaalada wadooyinka.




Markay mudo hal sano ah soo baray culuunta la xidhiidha gaadiidka iyo ka hortaga shilalka ayaa waxay ku soo noqotay deegaanka. Waxa ayna ka hawl gashay qaybta wacyigalinta ee taraafikada deegaanka. Waxayna bilawday sidii ay bulshada deegaanka ugu baraarujin lahayd khatarta ay leeyihiin shilalka gaadiidka. Gaar ahaan bulshada ku nool caasimada deegaanka ee magaalada jigjiga.



Xaliimo iyada oo adeegsanaysa warbaahinta iyo kulamo joogta ah ayaa waxay bilawday inay ka wacyi galiso dadka. Waxayna ugu horayn ku bilawday kulan wayn oo ay isugu yeedhay dadwaynaha wax garadka ah ee magaalada. Waxa ay ku bilawday xaalada guud shilalka gaadiid ee deegaanka ka jirta.

Waxayna u sheegtay dadwaynihii waxyaabaha sababa shilalka gaadiidka.

Xaliimo waxay ku bilawday in xawaaraynta gaadiidka oo si xawli ah loo wadaa ay keenayso shil. Siiba meelaha dadku ku badan yihiin ay halistaasi ku badan tahay. Xaliimo oo usii wada sharaxaadii dadkii ka soo qaybgalay shirka ayaa waxay tidhi” waxyaabaha kale ee keena shilalka waxaa kamid ah



aqoon yari xaga dirawalnimada ah iyo ruuxa oo aan xilwayn isa saarin” waayo masuuliyadu waa shayga ugu muhiimsan marka gaadiidka la wado. Haddii uu ruuxa lafihiisa waxa u fiican uu garan waayo ruux kale daryeeli maayo. Waxaa kaloo ka mid ah adigoo marka aad gaadhiga wado wax cuna ama cabo taas oo halis shil iyana keenaysa. Waxyaabahan oo dhan waxay hormuud ka yihiin shilalka ayay tidhi xaliimo.

Xaliimo oo hadalkii sii wadata ayaa waxay tidhi “waxyaabahaas aan kor ku soo sheegnay waa waxyaabihii dadkiina gawaadhida wadaa ay sameeyaan” bal imika aynu eegno waxyaabaha looga baahan yahay dadka dhex lugaynaya wadooyinka.

Xaliimo ayaa waxay sheegtay in dadwaynaha laftirkoodu qayb ka yihiin shilalka waxa ayna sameeyaan ayay tidhi iyaga oo aan calaamadaha loogu talagalay raacin.

Waxaa jirta ayay tidhi” goobo ay tahay in wadada laga gooyo ama laga gudbo, waxaadna arkaysaa baabuurtii oo socota dadkuna iska dhex socdaan” taasina ayay tidhi waxay keenaysaa inuu meeshaas shil ka yimaado.

Xaliimo oo xooga saaraysa bulshada ayaa u sheegtay inay ka fojignaadaan marka ay wadooyinka gudbayaan.



Oo hadii aanay garanayn calaamadaha inay waydiiyaan saraakiisha wadooyinka taagan wadooyinka dhinacooda.

Kuwaas ayaa waxay idinka caawin doonaan meesha aad ka talaabaysaan iyo calaamadaha aad raacaysaanba.


Xaliimo waxay hadalkeedii ku soo gabagaaysay oo ay siisay bulshadii talafoon lanbar dhinaca wacyigalinta ah. Kaas oo loogu talagalay in wixii talo bixin ah bulshada lagu siiyo.

Bulshadii ka soo qaybgashay shirkaas wacyi galinta ah aad bay ugu farxeen xaliimo iyo dadaalka ay wado. Waxayna meesha ka balan qaadeen inay wixii hada ka danbeeya la shaqayn doonaan taraafikada deegaanka. Xaliimo waxay aad iyana ugu faraxday bulshada sidaas u faraha badan ee ay u samaysay wacyigalinta.

Waxa ayna garawsatay inay shaqadeedii si fiican u haysay. Iyadoo isku dhiirigalisay inay sii wado gaadhsiisana cidkasta oo wacyigalin u baahan. Waxayna sidaas ku sii waday abaabulkii ay dadka ku baraarujinaysay shilalka gaadiidka iyo siyaabaha ay tahay inay bulshadu u maro wadooyinka. Markii ay soo dhamaysay wacyigalintii qabaleeyada magaalada ayay waxay u jihaysatay dhinacaas iyo dugsiyada wax lagu barto.

Xaliimo waxay garawsatay in ardaydu marka ay dugsiyada ka soo baxayaan ay halis badan ku jiraan.





Madaamo ay dugsiyada hormaraan wadooyin waawayn dugsi kastana uusan taraafik hor joogin. Sidaas awgeed ayaa waxay go'aansatay in ay dugsi walba ka soo xusho arday. Ardaydaas oo ay bari doonto siyaabaha baabuurta looga gudbiyo ardayda iyo shuruucda aasaasiga ah ee wadooyinka.

Xaliimo waxay soo uruurisay arday dhan boqol iyo kontan arday oo dugsiyada kala duwan ka socda. Markii ay mudo ay xaliimo tababaraysay ayaa waxaa loo sameeyay xaflad ay ku qalin jabinayeen ardaydu.

Ardaydan ayaa waxay noqonayaan wakiilada taraafikada ee wadooyinka hormara dugsiyada. Waxayna ardaydu marka ay dugsiga ka soo baxaan iyo markay galayaan ka joojinayaan baabuurta iyagoo sidii taraafiga oo kale u kala hagaya. Waxaana ardaydaa la siiyay dhar u eg kuwa taraafikada oo ay xidhaan.

## Gunaanadkii

Xaliimo sidaas ayay guul ku gaadhay kagana midho dhalisay hadafkeedii ahaa inay bulshada ku baraarujiso waxyeelada shilalka gaadiidka. Sida aad kor ku soo aragteen halista shilalka ee wakhti xaadirkaani waa kuwo aad u sareeya. Hadaba bulshada wadooyinka maraysa iyo kuwa dirawalada ahba waxaa looga baahan yahay inay u hogaansamaan shuruucda. Sidoo kalana illaaliyaan calaamadaha iyo siyaabaha loogu talagalay in loo maro wadooyinka. Waayo waxaa ku jirta badbaadada nafta iyo maalka.

## Laylis

Ka jawaab su'aalahan soo socda

1. Xaliimo imisa caruur ah ayaa la dhalatay?
2. Xaliimo aabaheed maxaa ku dhacay?
3. Sababtay xaliimo ciidanka taraafikada ugu biirtay waa maxay?
4. Yay ahaayeen dadkay wacyiglaisay xaliimo?
5. Imisa arday ayay tababartay xaliimo?

